

Inta badan ma oga dhakhtarkaagu daawooyinka aad qaadato. Wakhtigan hadda la joogo maj oro liis lagu soo koobey dhamaan daawooyinka kala duwan ee aad qaadato. ADIGA oo kaliya ayaa og nooca daawooyinka aad hadda qaadato. Sidaa awadeed waad noo hawl fududeyn haddii aad noo keento liis ka kooban dhamaan daawooyinka aad qaadato mar kasta oo aad la soo xidhiidho rugaha daryeelka caafimaadka.

Daawooyinka aan qaato

- Soo qaado liiska daawooyinka aad qaadato marka soo booqaneyso dhakhtarka.
- Fadlan cusbooneysi liiska daawooyinka aad qaadato haddii lagu qoro daawo cusub.
- Haddii aad joojiso daawo aad hore u qaadn jirtey: Fadlan dul mari xariijin daawadaas isla markaana darifka ku caalamadee taariikhda aad joojisey.
- Haddii aad qorto liis ka kooban dhamaan daawooyinka aad qaadato oo dhan waxaa aad yareyneysaa halista ah in ay is faham daro timaado ama uu dhaco/yimaado qaladaad ku wajihan daawooyinka lagu siiyo xanuunada kala duwan. Wakhti aad u badan ayaa dhigmaya isla markaana adiga laftaadu uma baahanid in aad xasuusnaato dhamaan daawooyinka aad qaadato oo dhan, inta mar/jeer ee aad qaadato daawooyinka iwm. Marka aad la xidhiidho rugaha daryeelka caafimaadka.
- Fadlan xasuusnow xitaa in aad ku darto liiska dawooyinka aad qaadato daawooyinka aan loo baahneyn in uu dhakhtar soo qoro.

Fadlan u yeelo fiiro gaar ah laaska dawooyinka ee aad ka hesho farmashiyah/famasiiga ee lagu magacaabo ”**Dawooyinkayga ku kaydsan farmashiyaha/famasiiga**” waxaa kaliya oo uu muujinayaa dawooyinka kuugu hadhey famashiyaha/famasiiga ee aad ka soo qaadan karto. **Ma aha** liis muujinaya dawooyinka aad qaadato. Haddii uu shaki kaaga jiro fadla hore u soo qaado liiska dhamaan dawooyinka lagu qorey iyo waliba dawooyinkaaga laftooda marka aad soo booqaneyso dhakhtarka.

Liiska dawooyinka oo cusub waxaa laga soo qaadan karaa rugta daryeelka caafimaadka ee aad ka tirsantahay. Waxaa kale oo aad xitaa kala soo bixi kartaa bogga internetka adiga oo adeegsanaya ereyga lagu raadiyo ”Mina läkemedel VGR”.

Dawooyinka aan qaato

Liis lagu soo koobey dhamaan
dawooyinka aan qaato oo dhan

Mina läkemedel –
En samlad lista över alla mina läkemedel
Somaliska



Dawooyinka aan qaato

Fadla ku buuxi **dhanaan** daawooyinka aad qaadato, xitaa kuwa aad iskaa u soo gadatey ee aan loo **baahneyn in uu dhakhtar kuu soo qoro**. Fadlan xasuusnow in aad xitaa ku buuxiso **viitamiinada, daawo dhaqameedyada, boomaatooyinka iyo goojada indhaha**.

Magaca:

Taariikhda dhalashada:

Daawada (tusaale ahaan Alvedon, Trombyl, Simvastatin)	Awood (tusaale ahaan 500 mg)	Qiyaasta dawada la qaato (Fadlan sheeg tirada kiniinada aad qaadato iyo waliba inta jeer ee aad qaadato maalintii. Fadla qor haddii aad qaadato dawada "markaad u baahato oo kaliya")	Sababta aad u qaadato dawada (tusaale ahaan xanuun, dhiig kar)	faalo

Waxaan xasaasiyada ku qabaa:

Fadlan sharav fal celinta: